

2024 Neighborhood STAR – Su’aalaha Codsiga ee Wareegga Sannadlaha ah

Each narrative question has a character limit of 5000 characters or fewer.

Macluumaadka Codsiga

1. Qaddarka codsiga deeqda:
2. Waadhka:
Degmada:
3. Cinwaanka/goobta meesha aad u codsanayso maalgelinta:
4. Ka bixi sharraxaad mashruuca aad u raadinayso maalgelin. Fadlan si gaar ah u sheeg (tusaale, dibu-habaynta wejiga dhisme leh 3 dariishado cusub iyo albaabo cusub; ku rakibid dariiq cusub oo lagu lugeeyo iyo calaamado dhinaca hore ee dhismaha ah).
5. Fadlan keen wakhtiga lagu qiyaasay iyo waxqabadyada la xidhiidha mashruucaaga. Fadlan ogow in maalgelinta Neighborhood STAR la isticmaali karo oo keliya kadib markuu oggolaado maalgelinta Duqa iyo Golaha Deegaanka. Tusaale ahaan:
Julaay-Agoosto: Burburinta goobta baarkinka
Sebtembar-Oktoobar: Daamur cusub iyo saaridda goobta baarkinka ah
Oktoobar-Noofambar: calaamad cusub ayaa la rakibay
6. Wixii ku saabsan horumarinta meelaha bannaan ee guud ama gaarka ah, fadlan sharrax goobta(aha) ugu dhow hagaajinta iyo sida horumaradaasi loo sii wadi doono 7+ sano. Haddii qiimaynta ganacsiga ama mulkiilaha hantida looga baahan doono hagaajintan, fadlan sharrax habka aad u wajahayso mulkiilayaasha hantida.
7. Wixii ku saabsan barnaamijyada amaah-hoosaadka/deeqaha-hoosaadka, fadlan ku lifaaq tilmaamaha barnaamijka. Tilmaamaha waa inay ku jiraan:

tirada guryaha, ganacsiyada, ama ururrada la caawinayo; sida ka qaybgalayaasha barnaamijka loo dooran doono; haddii barnaamijka la iskula dubaridi doono barnaamijyada kale ee magaalada; Xeerarka iyo shuruudaha looga baahan yahay dayn-qaateyaasha/deeq-qaatayaasha; shuruudaha qoran ee amaahda, haddii ay khuseyso, iyo hadhaayada hadda, haddii ay jiraan, maalgelinno hore oo STAR ay bixisay.

Ujeeddada Dadweynaha

1. Fadlan sharrax sida soo jeedintaadu u ilaalin doonto ama u kordhin doonto salka cashuuraha Saint Paul (tusaale ahaan, cashuuraha guryaha iyo/ama cashuuraha iibka).
2. Please provide the number and salary of new permanent full-time and part-time jobs that will be created and retained over the next five years as a result of this project. Retained jobs are only those jobs that would be lost without STAR funding:
New, permanent full time jobs:
Average salary:
#Retained permanent, full time jobs:
Average salary:
#New, permanent part time jobs:
Average salary:
#Retained, permanent part time jobs:
Average salary:
3. Soo jeedintaadu dib ma u soo celin doontaa goobta bakhaarka hortiisa ee hadda bannaan?
4. Fadlan sharrax sida mashruucaagu u horumariyo wax-ka-qabadka cimilada, waaritaanka, iyo/ama adkaysiga sida ku cad Qorshaha Waxqabadka Cimilada iyo Adkaysiga ee Saint Paul.
5. Fadlan sharrax sida mashruucaagu wax ugu biirinayo, ugu dabaaldegayo, ama u xoojinayo kala duwanaanshaha dhaqameed ee Saint Paul.

6. Fadlan sharrax sida mashruucaagu uga qayb qaato sinnaanta, oo lagu qeexay hubinta in fursadaha waxbarashada, shaqada, guryeynta, caafimaadka, iyo badbaadada si siman loo qaybsado; in dhammaan dadka deegaanka ay helaan waqti ku habboon oo ay ku helaan adeegyada, agabka, taageerada, iyo fursada, iyo in jinsiyadda, aqoonsiga jinsiga, nooca galmada, luqadda, qowmiyadda, asalka qaran, heerka naafanimada, da'da, ama summada boostada uusan go'aamin ama diidin ama xaddidin qofna fursad uu ku gaadhayo awoodiisa buuxda.

Baahida Bulshada

1. Sharrax sida mashruucaagu u buuxiyo baahida xaafadda ama uu wax uga qabto yoolka xaafadda (tusaale, sidee mashruucaagu ugu habboon yahay Qorshaha Aagga Yar ee xaafaddaada?).
2. Sharrax sida soo jeedintaada ay ugu jirto talo ka timid bulshada horumarkeeda (sida, wada shaqaynta ama taageerada golaha degmadaada ama kooxda xaafaddaada).

Awoodda

1. Fadlan sharrax ururkaaga iyo awoodda ururkaagu u leeyahay inuu fuliyo mashruuca lagu soo jeediyay codsigaaga.
2. Yaa noqon doona maamulaha mashruuca? Fadlan sharrax taariikhdooda, xirfadahooda, iyo khibradooda maaraynta mashaariicda la midka ah.

Sheekada Miisaaniyadda

1. Barnaamijka Neighborhood STAR waxaa loogu talagalay in lagu siiyo maalgelin mashaariicda raasumaalka ah ee qiimaha leh laakiin loo fulin kari waayay dhaqaale yari darteed ayaa loogu talagalay maalgelintan dheeraadka ah. Fadlan sharrax baahidaad u qabto maalgelinta STAR.
2. Waa maxay **wadarta** kharashka ku kacaya mashruucaaga? Haddii wadarta kharashka mashruucaagu uu ka badan yahay codsigaaga deeqda STAR, fadlan qor ilo kale oo maalgelineed oo aad isticmaali doonto si aad u

dhammaystirto mashruucaaga.

- Fadlan qor wixii dhaqaale ah ee aad ka heshay Magaalada ama HRA shantii sano ee la soo dhaafay (ay ku jirto STAR), ama aad hadda u raadinayso mashruucan.

Foomamka miisaaniyadda

Fadlan qor dhammaan ilaha iyo waxyaabahad u isticmaalaysa maalgelinta, oo ay ku jirto maalgelinta STAR, ee mashruuca oo dhan. Ku lifaaq dhammaan qiyaasaha qandaraaslaha iyo agabka dheeriga ah marka ay khuseyso. Ilaa wadarta 20% ee maalgelinta STAR waxa loo isticmaali karaa iibka iyo/ama Kharashaadka Mashruuca Tooska ah, ama isku darka labada.

Ilaha (Dakhliga Mashruuca)

Isha	Qaddarka	Isha	La sugayo ama La Sugay?	Total
Neighborhood STAR Qaddarka La Codsaday		Neighborhood STAR	La Sugayo	\$
Maalgelinta Kale ee Magaalada				\$
Maalgelinta Kale ee Dawladda				\$
Maalgelinta Gaarka ah				\$
Sinnaanta Dhididka iyo/ama Shaqp Mutadawaca ah				\$
Mid kale (fadlan sharrax)				\$
Wadarta Ilaha Mashruuca:				\$

Haddii isu-dhignaanta looga baahan yahay mashruucan, ishee(ilahee) iyo qaddarkeedee ayaa loo isticmaali doonaa tartanka maalgelinta? Isha(ilaha): Qaddarka(ada):	
--	--

Qeexitaanno:

Maalgelinta Kale ee Magaalada: Maalgelin dheeraad ah oo ka timid Magaalada St. Pau.; i.e., CDBG, TIF, CIB, HRA

Maalgelinta Kale ee Dawladda: Maalgelinta gobolka, degmada, ama federaalka

Maalgelinta Gaarka ah: deeqaha gaarka ah, amaahda, tabarucaadka, ama tabaruca shaqsi-ahaaned

Sinnaanta Dhididka: Shaqaale tabaruc ah oo hagaajiya qiime hanti, oo lagu qiimeeyo \$15 saacaddii.

Maalgelinta Isu-dhiganta: Tabarucaad dolar dolar ah oo ah maalgelin kale oo aan magaalada ahayn sida looga baahan yahay tilmaamaha STAR. Ilaa 30% ka mid ah isku-dhignaanta loo baahan yahay waxay noqon kartaa tabarucaad aan toos ahayn oo ay ku jiraan nooca alaabo iyo adeegyo, shaqo tabaruc ah, iyo/ama sinnaanta dhididka.

Isticmaalka (Kharashaadka Mashruuca)

Isticmaalka	Qaddarka la isticmaalay Maalgelinta STAR	Qaddarka Maalgelinta la isticmaalay ee aan ahayn STAR	Wadarta
libsasho			\$
Dibu-qurxin/Dibu-habayn - Ganacsi			\$
Dibu-qurxin/Dibu-habayn - Deegaan			\$
Dhisme Cusub - Ganacsi			\$
Dhisme Cusub - Deegaan			\$
Horumarinta Danta Guud			\$
Hagaajinta Meel Bannaan oo Gaar ah			\$
Kharashaadka Mashruuca ee Tooska ah - fadlan qor (ku lifaaq dukumintiyo dheeraad ah haddii loo baahdo)	1. 2. 3.	1. 2. 3.	\$
Wadarta Isticmaalka Mashruuca:	Wadarta STAR: \$	Wadarta Aan AhaynSTAR: \$	\$

Qeexitaanno:

libsasho: libsashada hanti ama dhismo jiray

Dibu-qurxin/Dibu-habayn-Ganacsi/Deegaan: Hagaajinta dhismo ama goob sii jirtay

Dhisme Cusub Ganacsi/Deegaan: Ku darid, dhisidda dhisme ama goob cusub

Horumarin Dadweyne: Hagaajinta qaab-dhismeedka waddooyinka yaryar, qalabka garoonka

ciyaarta, kuraasta baarkinnada, calaamadaha ama nalka si loo hagaajiyo meelaha ay isticmaalaan dadweynuhu

Hagaajinta Meel Bannaan oo Gaar ah: Garoon ciyaareed ama beer bulsho oo ku taal hanti gaar ah
Kharashaadka Mashruuca ee Tooska ah: Kharashyada fudud ee la xidhiidha mashruuca. Maalgelinta STAR waxaa **loo isticmaali karaa** naqshadaynta, injineernimada, sharciga, iyo lacagaha amaahda, maaraynta mashruuca, oggolaanshiyada, iyo shaatiyada. **Maalgelinta Aan Ahayn STAR waa in** loo isticmaalo wixii ah mushahar kasta oo guud, maamulka, suuq-geyn, ama kharashyada hawlgelinta ee ku jira mashruuca.

Su'aalaha Codsadaha ee Ikhtiyaariga ah: Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa ujeeddooyin warbixineed oo keliya loomana isticmaali doono in lagu sameeyo go'aannada maalgelinta. Waxay ka caawinayaan Magaalada inay ogaato inaan gaarno dhammaan dadweynaha. Haddii aad doorbidayso inaad ka jawaabin su'aalahan, fadlan ku qor N/A qaybta jawaabta.

1. Qofka leh, kantaroola, ama hoggaamiya ugu yaraan 51% ganacsiga ama ururka ma isku sheegaa inuu xubin ka yahay mid ka mid ah kooxahan soo socda? (dooro dhammaan kuwa khuseeya)

- Isirka ama qomiyadda laga tiro badan yahay
- Mujaahid ciidan
- Qof leh hal ama ka badan oo naafonimo
- Qof ku nool faqri ama la dhibaatoonaya dakhli hoose
- Qof la dhibaatoonaya hoy la'aan
- Dumar
- Nin
- Jinsi-beddel
- Aan jinsi ahayn
- Jinsi kale
- LGBTQ+
- Mid kale (fadlan sheeg)

2. Haddii aad dooratay su'aasha 1aad "aqoonsi kale", fadlan sheeg. Haddii aanay khusayn ama aad door bidayso inaad shaacin, fadlan ku qor N/A jawaabta.

3. Sidee isla mulkiilaha koowaad ama maareeyaha waxqabadyada loo aqoonsadaa isir ahaan ama qowmiyad ahaan? (dooro dhammaan kuwa khuseeya)

- American Indian or Alaska Native
- Ashiyaan
- Madow ama Afrikaan Ameerikaan
- Hisbaanik ama Asalka Laatiinka

- Dhaladka Hawaiiian ama Jasiiradda Baasifigga
- Caddaan
- Doorbidaya inuusan ka jawaabin
- Mid kale (fadlan sharrax)

4. Haddii aad dooratay su'aasha 3aad "aqoonsi kale", fadlan sheeg. Haddii aanay khusayn ama aad door bidayso inaad shaacin, fadlan ku qor N/A jawaabta.

5. Ganacsigaaga ama ururkaagu ma yahay mid ay leedahay ugu yaraan 51% hal ama in ka badan oo dumar ah (ama haddii ay tahay ganacsi ay dadweynuhu leeyihiin, ugu yaraan 51% saamiyada ma leeyihiin hal ama in ka badan oo dumara) oo ma yihiin maamulka iyo hawlgallada ganacsiga/ururka ee maalinlaha ah oo ay gacanta ku hayaan hal ama in ka badan oo dumar ah ee leh?

- Haa
- Maya
- Doorbidaya inaad ka jawaabin

6. Ganacsigaaga ama ururkaagu ma yahay ugu yaraan 51% mid ay leeyihiin hal ama in ka badan oo ah shaqsiyaadka BIPOC (Madow, Dadka Asaliga ah, iyo Dadka Midabka leh) (ama haddii uu yahay ganacsi dadweynuhu leeyahay, ugu yaraan 51% saamiyada ma leeyihiin hal ama in ka badan oo shaqsiyaadka BIPOC ah) oo maamulka iyo waxqabadyada maalinlaha ah ee ganacsiga/ururka gacanta ma ku hayaan hal ama in ka badan shaqsiyaadka BIPOC ah ee leh?

- Haa
- Maya
- Doorbidaya inaad ka jawaabin

7. Ganacsigaagu shahaado ma ka haystaa CERT?

- Haa
- Maya
- Doorbidaya inaad ka jawaabin

8. Intee in le'eg ayaad lahayd ganacsigan ama ururkan?

9. Ganacsigaagu ama ururkaagu ma yahay ganacsi yar ama urur sida lagu qeexo ganacsiyo ama ururo ka hooseeya \$1 milyan iibka guud/dhakhliga la soo saaray ama wax ka yar 20 shaqaale oo waqti buuxa ah (MN Statute 645.445).

9a. Haddii ay tahay haa, immisa shaqaale ah oo u dhigma waqti buuxa (FTE) ayaad haysataa? (FTE waa shaqaale shaqeeya ugu yaraan 32 saacadood toddobaadkii. Fadlan ha ku darin qandaraaslayaasha ama tabaruceyaasha).

10. Ganacsi ama urur nooc ah ayaad leedahay?

- Makhaayad/Cunto Fudud
- Cunto/Khudaar
- Tafaariiq/Dharka/Hadyadaha
- Adeegyada Shaqsi-ahaaneed/Timo-harre/Koofeer
- Maddadaalo
- Adeegyada Xirfadeed
- Warshadaha/Wax-soo-saarka
- Tiknoolajiyadda
- Daryeelka Caafimaadka
- Mid kale

11. Haddii aad ku jawaabtay su'aasha 10aad "mid kale", fadlan sheeg ama ku qor N/A haddii aad doorbidayso inaadan shaacin macluumaadkan.

12. Sideed ku maqashay fursadda aad ku dalban karto maalgelinta STAR?

- Xubin Golaha
- Golaha Degmada
- Shaqaalaha Magaalada
- Ilimaylka Magaalada
- Baraha Bulshada
- Rugta Ganacsiga
- Saaxiib ama xubin qoyska ah
- Mid kale

13. Haddii aad kaga jawaabtay su'aasha 12aad "mid kale", fadlan sheeg ama ku qor N/A haddii aad doorbidayso inaadan shaacin macluumaadkan.

14. Koodhka NAICS. Ku qor N/A haddii aadan garanayn.

Lifaaqyo: Tilmaamo

Haddii aadan awoodin inaad keento mid ka mid ah dukumeentiyada la codsaday, fadlan soo rar dukumeenti sharraxaya sababta aadan u awoodin inaad keento dukumeentiga loo baahan yahay. Soo gudbinta dukumeenti maran oo aan lahayn wax sharraxaad ah ama ah "waxan soo gudbin doonaa marka la codsado" lama aqbali doono waxaana codsigaaga loo tixgelin doonaa mid aan dhammaystirnayn. Macluumaad dheeraad ah ayay codsan karaan shaqaalaha magaalada inta lagu jiro dibu-eegista soo jeedintaada.

Lifaaqyada Loo Baahan Yahay:

1. Caddaynta Kantaroolka Goobta (caddaynta xilliga doorka laguugu wareejiyay, Heshiiska libka, Ikhtiyaarka libka, Heshiis Kiro oo Jira 7+ sano, Heshiiska Kirada ee 7+ sano).
2. Caddayn ah in ganacsiga ama ururka ay si wanaagsan u aragto Xoghayaha Dawladda ee Minnesota
3. Qiyaasaha Qandaraaslayaasha
4. Mashruuca Foom Ahaan
5. Cashuur celinta ama dhaqaalaha la xisaabiyay labadii sano ee la soo dhaafay; ganacsiyada bilowga ah, qorshe ganacsi ayaa lagu beddeli karaa
6. CVyada maareeyaha mashruuca iyo maamulka kale ee muhiimka ah
7. Caddayn ah ilo dhaqaale oo dheeraad ah haddii ay jiraan (sida, waraaqaha ballan-qaadka ee ka socda bangigga ama Urur)
8. Tilmaamaha Barnaamijka Deeq-Hoosaadka/Dayn-hoosaadka (haddii ay jirto)
9. Sawirrada mashruuca/aagga adeegga ee aad soo jeedisay
10. W9

Lifaaqyada Aan Loo Baahnayn:

1. Siyaasadda Khilaafka Danaha
2. Warqadaha Talo-jeedinta ama Taageerada
3. Xaashidda hadhaagga ee hadda iyo/ama bayaanka hawlgalka

Xeerka Asturnaanta Xogta ee Minnesota/Ogaysiiska Tennessee: *Magaaladu waxay ku waydiisanaysaa inaad ku siiso codsigan macluumaad maaliyadeed oo kala duwan, ganacsi iyo shakhsiba. Macluumaadka aad bixiso waxay hoos imanayaan Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dawladda Minnesota ("Xeerka") kaas oo nidaamiya ururinta, abuurista, kaydinta, dayactirka, iyo faafinta macluumaadkaaga. Lagaagama baahna inaad bixiso macluumaadkan, laakiin haddii aad bixin weydo macluumaadka la codsaday, uma qalmi doontid deeqda barnaamijkan. Macluumaadka aad bixiso wuxuu noqon doonaa mid ay heli karaan shaqaalaha Magaalada iyo qandaraaslayaasha u baahan maamulka iyo maaraynta barnaamijka iyo sidoo kale kuwa kale sida uu oggol yahay sharciga iyo hay'adaha kale ee sharciga ama garsoorka.*